Waxaad ka caawin kartaa qoysaska siday ilmaha ugu hayn lahaayeen ammaan

Waalidiinta jecel ilmahooda ee raba inay ku hayaan meel ammaan ah. Marmar, caqabadaha nolosha ayaa ku adkeeya qoysaska in ay buuxiyaan baahiyaha ilmahooda. Waalidiinta daqdiga qaba waxa laga yaabaa inay xadgudub ama daranyan ku sameeyaa ilmahooda. Waxa laga yaabaa in aanay garanayn meesha ay u doonan lahaayeen taageero. Qoysaska ku nool beeshaadu waxay u baahan yihiin gargaarkaaga sidii ay ilmahooda ugu hayn lahaayeen ammaan marka noloshu ku adkaato.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Isticmaal koodhka QR iyo telefonkaaga xariifka ah si aad toos ugu tagto websaydka FAR, ama tag:

www.dshs.wa.gov/ca/about/far.asp

Washington State Department of Social & Health Services
DSHS 22-1508 SM (6/13)

Waxa loo baahan yahay beesha oo dhan si carruurtu ammaan u hesho

Ma naga caawin kartaa dhismaha beel ammaan u ah carruurteena?

Family Assessment Response (Jawaabta Qiimaynta Qoyska) Gobolka Washington (FAR)

Tageerada beesha, carruur badan ayaa ammaan ku ahaan kara guriga

Family Assessment Response (FAR) (Jawaabta Qiimaynta Qoyska) ee Children's Administration's (Maamulka Carruurta) ee cusub ayaa noo oggolaanaya in aan ku isticmaalo hab nooc kale ah qoysaska qaar ee qaba eedaymo xadgudub ama daranyo ilmaha ah. Qoysaska qaar waxay u baahan yihiin baaritaan si carruurto ammaan loogu xafido. Qoysas kalena waxay u baahan yihiin inay dib ugu xirmaan beesha, qoyska iyo asxaabta.

Qoysaska ku hawlan habka xanaanada ilmaha waxa badi ka luma isku-xirnaantaas. Marka qoysasku dib ugu xirmaan beeshooda, keliya ma noqdaan inay wax badan ka sii ogaadaan taageerada iyo adeegyada yaala, laakiin waxay weliba ka hawlgalaan beesha siyaabo badan oo ay kuwa kale u taageeraan.

Waxaan dhammaan kutiirsanaa qoysaskeena iyo beelaheena marka dhibi jirto. Marka ay qoysasku dhisaan xiriiradaas, waxay ka caawisaa sidii carruurta ammaan u heli lahayd.

Maalgashiga qoysasku wuu u fiican yahay ganacsiga.

Ganacsiyada yar iyo weyn waxay ka caawin karaan kahortagga xadgudubka iyo daranyeynta ilmaha

Qoysasku waxay u baahan yihiin caawintaada xagga:

Ku haynta carruurtaada guri ammaan ah:

- Dayactirka qasanadaha biyaha
- Shaqada korontada
- Dhisidda albaabyo iyo dayrar
- Haysashada adeegyada (korontada, kulka, biyaha, bulaacadda, qashinka, telefonka)
- Qalabka guriga
- Alaabta nadiifinta

Helista adeegyada kale iyo alaabaha:

- Dharka iyo kabaha
- Waxbarista iyo alaabta dugsiga
- Guryeyn ammaan ah (aqoonsiga ikhtiyaarada guryeyn ammaan ah – taageero ijaar)
- Gaadiid
  - Shatiyada baska
  - Dayactirka baabuurka
  - Uqaadista ballamada caafimaadka
- Adeegyada xirfadyahanimada
- Barashada xirfadaha aasaaska nolosha (shaqo raadinta, xirfadaha waalidnimada, nafaqada, helista dhakhtar qaata kuubanada caafimaadka, kuhaynta guriga ammaan iyo nadaafad).

Waqtigaaga ama aqoontaada ma u huraysaa si aad u caawiso ku haynta ilmaha meel ammaan ah?

Family Assessment Response (Jawaabta Qiimaynta Qoyska) Gobolka Washington (FAR)

Children's Administration (Maamulka Carruurtu) wuxu ku habaynayaa Family Assessment Response (FAR) (Jawaabta Qiimaynta Qoyska) xafiisyada degaanka inta u dhaxaysa Janaayo 2014 iyo Julaay 2016, haddii maalgelintu oggolaato. Qoysaska leh eedaynaha xadgudka iyo daranyeynta ilmaha, ee aan muujinin halis waxyeelo weyn ee ilmaha isla markiiba ama si joogto ah, ayaa uqalma FAR. Eedaymuhu waa inay buuxiyaan macnaha sharciga ah ee xadgudubka iyo daranyeynta ilmaha sida waafaqsan xeerka goblka Washington (RCW 26.44.020).

Ammaanka ilmuhu wuxu mar walba ahaan doonaa wadnaha shaqadayada.

Marka ay Waaxdu hesho eedaynta xadgudbka galmada ama xadgudub waxyeel jidheed ama daranyeyn, qoyska waxa loo qoondayn baadhis caadi ah ee CPS.